



# Cayayaanka La yiraahdo 'Emerald Ash Borer'

iyo qaababka loo maareyo geeda dambaseedka (ash)

Geeda dambaseedka (ash) waa geedo badanaa loo istacmaalo qurxinta magaaloo yinka – waxaa jira in ka badan 1 milyan oo geed dambaseed ah (ash) oo ku yaal xaafaha, jardiinooyinka iyo waddooyinka Hennepin County. Tiradaas waxay qiyaastii u dhigantaa 15 boqolkii ba geedaha oo dhan. Dhammaan geeda dambaseedka (ash) degmada ee aan la daaweyn waxay u badan tahay in uu galay cayayaanka 'emerald ash borer' oo ah cayayaan ka yimid Aasiya kaasoo dila geeda dambaseedka (ash).

Haddii geeda dambaseed (ash) ay ku yaalaan gurigaaga, waa hadda waqtigii aad bilaabi laheyd inaad ka fikiirto waxaad sameyn laheyd oo ah inaad daaweyso ama aad jarto.



## Xagee laga helay cayayaanka 'emerald ash borer'?

Cayayaanka 'emerald ash borer' waxaa laga helay magaalooinka intooda badan waxaan la filaya in laga heli karo dhammaan magaalooinka Hennepin County. Waxay u badan tahay in dhawaan lagu dhici doono geed dambaseed kasta oo aan la daaweyn oo degmada ku yaal. Waxay qaadan kartaa dhowr sano in geed dambaseedka uu muujiyo calaamadaha cayayaanka 'emerald ash borer', sidaa darteed waxaa dhici karta in xitaa geedaha u muuqda inay caafimaad qabaan ay ku jiraan marxaladaha hore ee cudurka.



## Sideen ku aqoonsan karaa geed dambaseedka (ash)?

Talaabada ugu hore xagga u diyaar garowga cayayaanka 'emerald ash borer' waa xaqijita in geed dambaseed uu ku yaalo gurigaaga iyo in kale. Hennepin County waxaa laga helaa noocyoo badan oo geeda dambaseed ah (ash) – cagaar, caddaan iyo madow. Raadi sifooyinka soo socda si aad u xaqijiso in geedkaaga uu yahay geed dambaseed (ash) iyo in kale:

- Laamo u baxa laba jiho oo iska soo horjeeda.
- Caleemo balaaran ama caleemo badan oo hal jirid ku wada yaal. Caleemuhu waxay badanaa ka kooban yhiin 5 ilaa 9 caleemood.
- Jilif u sameysan qaabka dheemanka.
- Miro u eg seebka doomaha lagu wado oo sida caadiga ahna u soo laalaada rucub rucub

Si aad wax badan ugaogaato sida lagu aqoonsado geed dambaseedka, ka soo degso xaashida xaqiyooyinka geed dambaseedka barta [hennepin.us/ashtrees](http://hennepin.us/ashtrees).



## Waa maxay calaamadaha lagu garan karo in cayayaanka 'emerald ash borer' uu galay geedka?

Calaamadaha soo socdaa waxay daliil u noqon karaan in cayayaanka 'emerald ash borer' uu galay geedka (ash):

- **Dhimashada caleemaha ee qaybta kore geedka:** Caleemaha qaybta kore ama qayb ka mid ah geedka ayaa bilaabaya inay dhintaan taasoo ugu dambeyn saameeyneysa geedka intiisa kale.
- **Laama cusub oo ka soo baxa geedka guntiisa:** Laama cusub oo ka soo baxa geedka xididadiisa ama salkiisa waxay caddeyn u tahay in geedku cadaadsan yahay.
- **Shimbirka quudquutaha oo dhaqdhaqaaciisu soo bata:** Quudquutuhu wuxuu cunaa dixriga ku dhex jira qolfaha geedka.
- **Qolfaha geedka oo cadaan xigeen isku beddelaa:** Waxaa sababa quudquutaha oo qolfaha ka ka fiiqa geedka marka uu raadinayo ukumaha cayayaanka 'emerald ash borer larvae', midab rogmidaasna waxaa lagu arki karaa geedka oo idil ama qayb ka mid ah.
- **Dildilaac ku yimaada qolfaha geedka:** Godadka uu dixriga ka qodo qolfaha hoostooda ayaa keeni kara in qolfaha ay dillaacaan.
- **Xarijimo qalqaloocan oo qolfaha hoostooda ah iyo godad u eg xarafka D:** Dixriga markuu cuno geedka unugyadiisa, wuxuu dhanka hoose ee qolfaha ku reebaa xarijimo qalqaloocan, sidoo kalena dixriga weeynaaday ee ka baxaya geedka wuxuu abuuraa godad u eg xarafka D.

Haddii aad u malaynayo inaad leedahay geed dambaseed (ash) uu galay cayayaankaas, la xiriir dhir yaqaanada magaaladaada ama qaybta jardiinooyinka si aad u go'aamiso talaabooyinkaaga xiga.



# Qaababka loo maareyo geeda dambaseedka (ash)

Waxaa jira laba qaab oo aad ku maareyn karto geeda dambaseedka (ash) ku yaal gurigaaga: inaad daaweyso adiga oo isticmaalaya sunta cayayaanka ama inaad jarto ka dibna dibadda u saarto.

## Daaweynta geeda dambaseedka (ash)

In lagu daweyyo sunta cayayaanka waa qaab lagu ilaalin karo geeda dambaseedka (ash) qiiimaha sare leh. Geed dambaseed (ash) baaluq ah oo caafimaad qaba oo wareega jiridiisa uu gaarayo ugu yaraan 30 inji (ama 10 inji oo dhexroor ah) gaaraya dheerarka xabadka oo sidoo kalena qjimo sare u leh milkiilaha guriga ayaa ah geedka mudan in la badbaadiyo. Haddii aad go'aansato inaad daaweyso geeda dambaseedkaaga (ash), daaweynta waa inay isla markiiba bilaabataa. Daawaynta badbaadinta geedka waa in uu fuliyaa xirfadle takhasus u leh dhirta oo shahaado haysta qiyastii labadii sanaba mar dabayaqaqada gu'ga. Qiimuhu waa kala duwan yahay waxayna ku xiran tahay inta uu le'eg yahay geedka laakiin badanaa wuxuu u dhexeeyaa \$200 - \$300 calaa geed oo laguu daaweyyo.



Hennepin County waxay istacmaashaa oo ay geedaha ku duraan sunta la yiraahdo emamectin benzoate si ay ugu daweeyaan geeda dambaseedka (ash) tayada sare leh ee ku yaal guryaha degmada. Tani waa daaweyn waxtar fican leh mana ahan sunta neonicotinoid oo la sheegay in saameyn xun ay ku

reebto faxal gudbiyaasha dhirta (pollinators). Sunta emamectin benzoate waa sun si gaar ah loogu talagalay inay waxyeeleyso cayayaanka 'emerald ash borer' sidaa darteed way yar tahay waxyeelada ay u geysato cayayaannada kale. Intaa waxaa dheer, geeda dambaseedka (ash) waa geedo ay dabeeshu faxliso mana ahan geedo ku tiirsan cayayaanka si ay u tarmaan.

Xaaladaha qaarkood, waxaa dhici karta in aysan habooneyn in geeda dambaseedka la daaweyyo. Haddii 30% ama in ka badan caleemaha iyo laamaha ay dhintaan ama haddii jilfaha geedka ay cadaan xigeen ah noqdaan, waa calaamado muujinaya heirka waxyeelada cayayaanka, sidaa darteed ma habboono in la daweyyo geedkaas. Daraasado ayaa muujinaya in ay u badan tahay in daawaynta aysan shaqayn doonin mar haddi dhacawa uu gaaroheerkas, haddii ay shaqeysana, geedkaas wuxuu u baahanaya in shaqa culus laga qabto oo laga jaro qaybaha dhintay ama dhimanaya.

## Jarista iyo asturida geedaha

Geed dambaseed (ash) kasta oo aan la daaweyn ugu dambeyn wuxuu ku qasbanaan doonaa in la jaro. Geedaha waa inuu jaraa xirfadle takhasus u leh dhirta oo ay aqoonsan tahay hay'adda ISA, caymis haysta, la iskuna halayn karo. Geedaha dhintay waa in la jaraa ka hor inta aanay khatar noqon. Haddii deriskaaga aad la kaashato oo aad si wada jir ah u qabsataan hal shirkad si guryo badan ay geedo uga jarto, waxay idinka caawin karta in kharashka idinka yaraado.

Qaybaha laga jaray geed dambaseedka (ash) waa in lagu qubaa goobaha qashin qubka ee degmada, waana in aan loo qaadin meel ka baxsan nawaaxiga Twin Cities si looga hortago faafitaanka cayaanka emerald ash borer. Ka hel goobaha qashin qubka barta [hennepin.us/yardwaste](http://hennepin.us/yardwaste).

## Maalgelinta jarista geedaha

Horraantii sanadkan 2024, Hennepin County waxa la siiyay 10 milyan oo doollar oo ah maalgelin ka timid wakaalada U.S. Forest Service taasoo loogu talagalay in lagu jaro geedaha buka, in lagu abuuro geedo kale, in dadka deegaanka lagu wacyigeliyo, iyo in lagu taageero ganacsiyada iyo horumarinta shaqaalaha. Shaqada mashruucan waxay bilaaban doontaa guga 2024 waxayna socon doontaa ilaa Janaayo 31, 2029. Hennepin County waxay milkiilayaasha guryaha ee dakhligoodu yar yahay ku caawin doontaa in laga jaro loona beddelo geedaha guryahooda ku yaala. Codsiyada waxaa dadka deegaanka laga qaban doonaa laga bilaabo Juun 2024.



Booqo [beheardhennepin.org/urban-community-forestry](http://beheardhennepin.org/urban-community-forestry) si aad ula socoto wixii cusub, si aad u rukumato barta, iyo si aad u hesho agabka codsiga.

## Dib u abuurista



Geedaha waxaa laga helaa faa'iidooyin badan waxaan ka mid ah kor u qaadista tayada hawada iyo biyaha, yaraynta nabaad-guurka ciidda iyo qulqulka biyaha roobka, kordhinta deegaanka duurjoogta, yareynta tamarta ku baxda kuleylinta iyo qaboojinta guryaha, kor u qaadista caafimaadka, iyo kordhinta qiimaha guryaha. Marka waa fikrad wanaagsan in aad geed ku abuurto meel aad geed kale ka jartay.

Markaad geedo abuureyso, dooro noocyada geedaha ee sida fiican uga baxi karo aagga aad degan tahay. Hubso in geedaha aad beereyso ay yihiin kuwo ku habboon meeshaas si ay u noqdaan kuwo caafimaad qabo oo faa'iidooyin badan laga helo.

La xiriir dhir yaqaanada magaaladaada haddii aad rabto macluumaad ku saabsan sida loo xusho geedaha sida fiican uga bixi karo aaggaaga.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan beerista geedaha iyo daryeelkooda, booqo barta Minnesota Department of Natural Resources ee ah [dnr.state.mn.us/treecare/residential\\_plant.html](http://dnr.state.mn.us/treecare/residential_plant.html) ama barta wakaalada U.S Forest Service Tree Owner's Manual ee ah [usfs-public.app.box.com/v/TreeOwnersManual](https://www.fs.usda.gov/treesearch/pubs/5000).

## **Xuquuqaha sawirka**

*Sawirka jaldiga: Macroscopic Solutions, LLC*

*Bogga 3: U.S. Department of Agriculture (sawirka EAB ee saaran caleenta), Hennepin County Master Gardeners (dhaawaca geedka), U.S. Forest Service Region 5 (sawirka EAB ee saaran qoriga), David Wright (geed dambaseedka), Lindy Buckley (caleenta geedka), Eli Sagor (qolofka geedka madoow), a200/a77Wells (miraha geedka); dhammaan sawirada waxaa laga helay barta [flickr.com](#) waxaana idinkaas bixisay Creative Commons license 2.0*

*Bogga 4 Eric R. Day, Virginia Polytechnic Institute and State University, [Bugwood.org](#) (caleemaha kore); Minnesota Department of Agriculture (dhaawaca geedka, godadka geedka iyo midab rogmida qolofka); Joseph O'Brien, USDA Forest Service, [Bugwood.org](#) (laamo)*

*Bogga 5 R. R. Jeanette Martin, [flickr.com](#) waxaana idinkaas bixisay Creative Commons license 2.0*

*Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay*

*Maalgelinta uu bixiyo sharciga dhimista sicir bararka iyo USDA Forest Service*